Oregon Health Authority
QAYBTA CAAFIMAADKA

Su'aalaha Aalaaba La Isweydiiyo ee Ku Saabsan Tallaalada COVID-19 ee Oregon

Soogalootiga iyo shaqaalaha beeraha ee xilliyeed, shaqaalaha cunto badeedka iyo beeraha, iyo shaqaalaha soo saara cuntada ayaa u-qalmaan inay helaan tallaalka COVID-19.
Halkan waxaa ku yaala jawaabaha su'aalaha aalaaba la isweydiiyo.

S: Sababtee u qaataa tallaalka COVID-19?

Tallaalku waa hab badqab leh oo wax-ku-ool ah oo adiga iyo dadka aad jeceshahayba idin ka dhigaya kuwa ka badqaba COVID-19. Tallaalku wuxuu xoojinayaa jirkaaga si uu ula dagaallamo COVID-19 kaagana difaaco inaad jirrato. Kama qaadeysid COVID-19 tallaalka.

S: Tallaalka COVID-19 ma badqab baa?

Dhammaan tallaallada COVID-19 ayaa la tijaabiyey si loo hubiyo inay badqab yihiin oo waxtar leeyihiin. Waxaa lagu tijaabiyay tobanaan kun oo qof—oo ay ku jiraan dad badan oo reer Oregon ah—oo leh asallo, da’aad, bulshooyin kala duwan, oo qaar badan oo ka mid ah waxay qabeen dhibaatooyin caafimaad oo hoose sida wadne-xanuun ama cudurka sambabka, sonkorow, iyo xaaladaha daciifiya difaaca jirka.

S: Miyuu tallaalku iga ilaalin doonaa inaan qaado COVID-19?

Tallaallada COVID-19 ayaa si aad ah waxtar ugu leh kahortagga cudurka halista leh iyo isbitaal dhigista.

S: Maxay yihiin waxdhimaalada tallaalka COVID-19?

Kadib markaad qaadato tallaalkaaga, waxaa laga yaabaa inaad ku yeelato nabar gacanta lagaa tallaalay. Dadka qaarkood waxay sidoo kale dareemi doonaan daal ama qandho ayaa qaban doonta dhowr maalmood. Tani lama macno aha inaad jirran tahay. Waxay ka dhigan tahay inuu tallaalku shaqeynayo si uu jirkaagu u caafimaado.

S: Sidee tallaaladu u shaqeeyaan?

Tallaalladu waxay u sheegaan unugyadeena sida loo sameeyo borotiin aan waxyeello lahayn oo la mid ah borotiinka ku dahaaran fayraska. Habdhiskayaga difaaca jireed wuxuu arkaa borotiinada wuxuuna dhisaa unugyada difaaca jirka ee xasuusan doona sida loola dagaalamo fayraska COVID-19 haddii aan cudurka qaadno.

S: Waxaan horey u qabay COVID-19. Miyaan weli u baahannahay inaan is tallaalo?

Haa. Xitaa hadduu ku hayay COVID-19, tallaalku wuxuu gacan ka geysan doonaa inuu ku ilaaliyo adiga iyo dadka kugu xeeran. Sug ilaa aad si buuxda uga bogsato COVID-19 kahor intaadan tallaal qaadan.

S: Xagee talaalka ka heli karaa??

Booqo khariidada tilmaamta goobta tallaalka si aad u hesho bixiye tallaal oo kuu dhow ama wac 211 ama (866) 698-6155 si aad ugu hesho macluumaad iyo kaalmo luuqad kasta.

S: Immisa ayey ku kacaysaa? Ma la iga rabaa inaad lahaado caymis?

Talaalku waa u lacag la'aan qof kasta oo ku nool Oregon. Laguguma soo dallici doono lacagta ballanta ama tallaalka. Lagaagama baahna caymis caafimaad si aad u hesho tallaalka.

S: Ma la iiga baahan yahay inaan keeno aqoonsi si aan u caddeeyo u-qalmitaankayga?

Maya. Uma baahnid inaad la imaatid cadeynta u qalmida. Waxaa lagaa codsan karaa inaad ka shaqeysid beer, goob cunto badeed, ama xarunta soo saarta cuntada. Waxaa lagaa codsan karaa inaad keento aqoonsi shaqsiyeed.

S: Ma la iiga baahan yahay inaan bixiyo lambarka sugnaanta bulshada si aan u helo tallaalka?

Maya. Uma baahnid lambarka amniga bulshada.

S: Ma inaan ahaadaa muwaadin Ameerikaan ah si aan u helo tallaalka? Miyuu saamayn doonaa xaaladdayda socdaal ama ma la igu soo oogi doonaa dacwad?

Qof kasta oo ku sugan Oregon u-qalma ayaa heli kara tallaalka. Lagaagama baahna inaad noqotid muwaadin Ameerikaan ah oo ma saameyn doonto xaaladdaada socdaal ama laguguma soo oogi doono dacwad.

S: Maxaa ku jira tallaalada COVID-19?

Tallaalku ma beddelayo hiddo-sidahaaga (DNA) kamana koobna fayras nool ama wax xayawaan qalaad ah. Tallaallada Pfizer iyo Moderna waxaa laga sameeyaa maaddo jirku si dabiici ah u abuuray. Tallaalka Johnson & Johnson wuxuu adeegsadaa fayras naga dhigaya kuwa iska difaaco COVID-19.

S: Ma ku jiraan unugyada uurjiifka tallaalka?

Maya. Kuma jiraan wax unugyo uurjiif ah midkoodna tallaallada. Tallaalka Johnson & Johnson wuxuu adeegsadaa fayras qabow oo aan waxyeello lahayn si uu tilmaamo ugu gudbiyo jirka. Soo saarista tallaalkan fayraska ah wuxuu u baahan yahay adeegsiga unugyo lagu koriyay shaybaarrada kuwaasoo laga soo qaaday unug uurjiif

sannado badan kahor, balse tallaalka la dhammeystiray waa la nadiifiyaa oo kama koobna wax unugyo uurjiif ah ama hido-raaca bini'aadamka ah.

S: Ma u baahannahay irbad labaad oo tallaalka ah? Sidee ku ogaan doonaa goorta iyo meesha aan aadayo?

Wixii tallaalada Pfizer iyo Moderna ah, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad qaadatid laba cirbado. Waxaad qaadan doontaa irbada labaad 3 ama 4 toddobaad ka dib markaad qaadatid mida koowaad. Waa kuu muhiin inaad qaadatid labada irbadood. Rugta caafimaadka aad ka heshay irbadaada koowaad ayaa kula soo xiriiri doonta si ay u muddeeyaan irbadaada labaad. Tallaalka Johnson & Johnson waxaa laga qaataa hal irbad keliya.

Waa lagula socodsiin doonaa nooca tallaalka aad qaadanayso iyo nooca dabagalka, haddii ay jirto, aad u baahan tahay inaad hesho. Waxaad heli doontaa caddeynta tallaalkaaga. Ha lumin kaarka lagu siiyay.

S: Waxa la sameeyo haddii aan lumiyo kaarka talaalkeyga?

Haddii aad lumisid ama halaysid kaarka tallaalka, waxaad u isticmaali kartaa diiwaanka tallaalkaaga caddeyn ahaan. Waxaad heli kartaa diiwaankaaga tallaalka adigoo:

- Ka hubso daryeel caafimaad bixiyahaaga ama mareegtooda, si aad diiwaan ugu sameysato tallaalkaaga
- Adeegsanaya Bogga Dhigaalada Tallaalka ee OHA si aad u codsato diiwaankaaga. Waxay qadaan kartaa 5 maalmood inaad ku heshid diiwaankaaga.
- Wac 211 si lagaaga caawiyo luuqadaha aan aheyn Ingiriiska.

S: Haddii aan ka qaatay qiyaastaydii ugu horreeysay ee tallaalka gobol kale, ma ka heli karaa qiyaasta labaad gudaha Oregon? Haddii aan qaato qiyaastayda ugu horreysa ee tallaalka gudaha Oregon, miyaan ka heli karaa qiyaasta labaad gobol kale?

Waxaad ka heli kartaa qiyaastaada labaad gudaha Oregon xitaa haddii aad ka qaadatay qiyaastaada koowaad gobol kale. Waa inaad keentaa kaarka muujinaya caddeynta qiyaastaada ugu horreysa kaasoo muujinaysa nooca tallaalka lagu siiyay. Haddii aad ka qaadatid qiyaastaada ugu horreysa ee Oregon balse aad u baahan tahay inaad ka qaadatid qiyaasta labaad gobol kale, hayso kaarka muujinaya caddeynta qiyaastaada koowaad.

S: Uur ayaan leeyahay. Ma heli karaa tallaalka COVID-19?

Haa. Dadka uurka leh iyo kuwa hadda uurka qaaday ayay u badan tahay inay aad ugu xanuunsadaan COVID-19 marka lala barbardhigo dadka aan uurka lahayn. Xanuun

daran oo ka dhasha COVID-19 inta aad uurka leedahay waa laga fogaan karaa iyadoo si buuxda loo isku tallaalayo. Xarumaha Xakameynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) ayaa kula talinayaa dhammaan dadka da'dooda tahay 12 jir iyo ka weyn inay iska tallaalaan COVID-19, oo ay ku jiraan dadka uurka leh, naasnuujinaaya, iskudayaya inay uur hadda qaadaan ama laga yaabo inay uur yeeshaan mustaqbalka.

S: Miyaa la iiga baahan doonaa inaan qaato tallaalka?

Batrooniyaashu waxay ka rabi karaan shaqaalaha inay is tallaalaan, marka laga reebo qaarkood. Kala hadal batroonigaaga wax ku saabsan inay kaa rabaan inaad is tallaasho iyo in kale. Haddii loo-shaqeeyahaagu u baahdo tallaal balse ay daacad kaa tahay aaminaada diimeed, naafonimada, ama arrinta caafimaad ee kaa horjoogsanaya inaad qaadato tallaalka, batroonigaagu ayaa looga baahan karaa inuu kuu sameeyo ka-dhaafitaan adiga.

S: Xagee ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg covidvaccine.oregon.gov (Af-Ingiriis) ama vacunacovid.oregon.gov (Af-Isbaanish). Waxaad sidoo kale wici kartaa 211 ama (866) 698-6155 si aad ugu hesho macluumaad luqad kasta.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.